

Xeerka 3 Disember 1956, lamba. 10 rep.

U wareejinta Wasiirka Arrimaha Guud iyo Golaha Wasiirada xilalka qaarkood ee uu iqtiyaarka u lahaayeen Maamulaha iyo Guddiga Maamulka ee Xeerka Shaqaalaha Dawladda

MAAMULAHA

Marka uu arkay amarka 5 Abril 1954, lamba. 9 “Xeerka Shaqaalaha Rayidka Soomaaliya.

Marka uu garowsaday in loo wareejiyo Wasiirka Arrimaha Guude iyo Golaha Wasiirada xilalka qaarkood ee iqtiyaarka u lahaayeen Maamulaha iyo Guddiga Maamulka arrimaha lagu nidaamiyay amarka la soo xusay;

Marka la dhagaystay Golaha Wasiirada;

Uuna ku soo taliyay Wasiirka Arrimaha Guud

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Xilalkii iyo iqtiyaarkii ku cad qod. 6, faqradda koowaad, 7; 14; 18; 23; 24; ee Amarka 5 Abril, lamba. 9 ee loo wareejiyay Maamulaha, waxaa loo wakiishay Wasiirka Arrimaha Guud.

Qod. 2

Dallacadda ku saabsan darajada 2 iyo 1 waa in ay dhagaysteen Golaha Wasiirada halkii marki hore ay ahayd in ay dhagaystaan Guddiga Maamulka, sida ku cad qod. 8 ee Amarka la soo sheegay.

Muqdisho, 3 Setember 1956.

P. Maamulaha
P. Franca

Cabdullaahi Ciise Maxamuud

Maxamuud Cabdi Nuur

Lagu hubiyay lamba. 740 ee 12 Disember 1956.

Madaxa Xisaabaadka: **Tura**

La hubiyay lana Diwaangeliyay – Diw. lamba. 21, bogga lamba. 47.

Muqdisho, 13 Disember 1956.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**